**2021 Kala-Fadhiga Guud ee Sharci-dejinta ee Colorado**
**Qoddobada Sharciga Middeysnaanta Soogalootiga**

- **Xeerka Aqalka ee House Bill 21-1054** (Sen J. Gonzales iyo Rep. D. Jackson): Sharcigan ayaa wuxuu xaqiijinaya in kuwa aan Maraykanka sharciga ku joogin ay marin u heli karaan **kaalmada guryaynta** ee gobolka iyo degmada. Inkastoo barnaamijyada guryaynta qaar ay dhici karto in lagu xiro xaq u yeelasho federaali ah oo qofka looga baahan yahay nooc xaalad degnaansho, shaqsiyaadka aan sharciga ku joogin iyo qoysaskooda ayaa kordhin doona helitaan ilooyin xasiloonaan guryayanta ah.

- **Xeerka Golaha Guurtida ee Senate Bill ee 21-077** (Sen J Gonzales iyo Reps. Benevidez, C. Kipp): Xaaladda soogalootinimo hadda wixii ka dambeeya ma noqon doono shuruuddaha xaq u yeelashada ee heer gobol iyo **ruqsaddaha, shahaadooyinka ama diiwaangelinta.** Tusaalooyinka tan waxaa ka mid ah ruqsaddaha shaqooyinka, sida Kaaliyayaasha Kalkaaliyeyaasha ee Shahaadada haysta, ama shatiyada gancasiga degmada. Isbeddelladan wuxuu saamaynayaa dhammaan reer Coloradans oo dhan iyadoo loo eegayn inuu qofka sharci ku joogo iyo in kale, oo ay ku jiraankuwa haysta ruqsad lagu shaqaysto sida kuwa haysta DACA.

- **Xeerka Golaha Guurtida ee Senate Bill 21-009** (Sen S. Jaquez Lewis iyo Rep. Y Caraveo): Samaynta barnaamij cusub, dadka reer Coloradans, oo ay ku jiraan kuwa aan dukumiinti aan haysan, ayaa marin u heli doona **adeegyada ka hortagga uurka iyo la talinta** si ay markaa u qorsheeyaan wixii iyaga iyo qoysaskooda ku habboon.

- **Xeerka Golaha Guurtida ee Bill SB 21-131** (Sen J. Gonzales iyo Rep S. Gonzales-Gutierrez). Si loo xaqiijiyo in **asturnaanta xogta** arjiyo qortayaasha u soo qortay barnaamijyada gobolka iyo adeegyada ay bixiyaan, oo ay ku jiraan shati darawalnimo, hay'addaha dowladda gobolka ma bixin karaan xogta lagu aqoonsado shaqsiga ee la xiriira fulinta xaaladda socdaal, aysan ka ahayn haddii sharci ahaan looga baahan yaay ama yahay amar maxkamadeed, waarabm ana amar. Hay'addaha dowladda gobolka waa inay caddayn helaan ka hor inay ay xogta shaqsiga ayna wadaagin, waa inay xaddidaa ururinta xogta ee xaaladda socdaal taas oo ay daruuri tahay, oo waa inay si joogto ah warxbin ugu gudbisaa si loo hubiyo inay adeecayaan sharcigan cusub.

- **Xeerka Aqalka ee House Bill 21-1150** (Sen J. Gonzales iyo Rep. D. Jackson): Samaynta **Xafiiska Cusub ee Office of New Americans** ee Colorado ee ka dhex shaqeeya Waaxda Shaqaalaha iyo Shaqada waxay hubiyaan arrimaha la xiriira soogalootiga sare loo qaado oo waxna looga qabto heer dowlad gobol. Xeerka ayaa wuxuu abuuraya guddi la talin bulsho oo wuxuuna saadaalinayaa maalgashi lagu sameeyo kaabayaasha ururada ka shaqeeya bulshada dhexdeeda si loo hubiyo in si soogalootiga ay si siman ay fursaddaha u wada helaan.

- **Xeerka Aqalka ee House Bill 21-1194** (Sen D. Moreno iyo Reps. K. Tipper, N. Ricks): **Sanduuqa difaaca sharciga socdaalka** wuxuu ballaarin doonaa helitaanka adeegyo sharci oo bilaash ah iyo matalaad in la matalo shakhsiyaadka dakhligoodu hooseeyo ee dacwadaha socdaalka, iyada oo mudnaanta la siinayo kuwa ku jira xabsiyada socdaalka iyo kuwa wajahaya masaafurinta ee jooga meelaha fog ee gobolka dhexdiisa. Xafiiska The Office of New Americans wuxuu deeqi u fidin doonaa iyaoo deeqaha loo soo marin doono ururada macaash doonka aan ahayn ee ka jira gobolka Colorado si ay u bixiyaan talooyinkan sharciyeed ee bilaashka ah, la-talinta, iyo metelaadda.

- **Xeerka Guriga ee House Bill 21-199** (Sens S. Jaquez Lewis, F Winter iyo Rep. D. Esgar, S. Gonzales-Guiterrez). Si loo abuuro sinaan xagga fursaddaha ah, laga bilaabo 1da bisha Luulyo, 2022, sharci ku joogitaanka mar dambe shuruud uma noqon doonto qaar ka mid ah manfacyada dadweynaha ee dowladda gobolka iyo maxalliga ah, haddii uu oggol yahay sida hoos timaada sharciga dowladda federaalka. Tani waxay ballaarineysaa helitaanka wixii ka baxsan waxa laga heli karo sida hoos timaada xeerarka SB 21-077 iyo HB 21-1054.

- **Xeerka Guriga ee House Bill 21-1057** (Sens R Rodriguez, J Cooke; Reps K Tipper, D. Roberts). Sharciga hadda ayaa wuxuu sheegaya in ay dambi tahay in loo hanjabo in la soo sheego qof kale xaaladdiisa soogalootinimo si looga xado lacag ama waxyaabo qaali ah. Waxaa kaloo tani la jira in ay dambi tahay in loo hanjabo in la soo wargaliyo qof xaaladdiisa soogalootinimo si qof looga keensado inuu sameeyo wax (ama uusan samayn).

- **Xeerka Aqalka ee House Bill 21-1075** (Sen J. Gonzales iyo Rep. D. Jackson): Haddalka waa muhiim. Xeerkan wuxuu meesha ka saarayaa adeegsiga ereyga shisheeyaha sharci darrada ah (illegal alien) marka laga hadlayo adeegyada booskeeda waxaa lagu bedellayaa "shaqaale bilaa oggolaansho ah."

- **Xeerka Guurtida ee Senate Bill 21-233** (Sens R Rodriguez iyo C Hansen; Reps A. Benavidez, S. Gonzales-Gutierrez). Soogalootiyayaal badan oo aan sharci ku joogin ayaanu u qalmin caawimaadda baalgamuundada sababo la xiriira xaaladdooda soogalootinimo. Xeerkan ayaa daadihinnaya daraasad si loo caawiyo fahamka mid noqoshada manfacyada baalgamoondada ee loogu talagalay dadka reer Coloradans-ka aan sharciga haysan oo gobolkeena uu u ekaan karo.

- **Xeerka Aqalka ee House Bill 21-1060** (Sen J. Gonzales iyo Rep S. Gonzales-Gutierrez). "U visa" ayaa waxay bixisaa waddo hoos timaada sharciga socdaalka ee federaalka taas oo qofka u hagta inuu helo sharci degnaansho joogto ah ee loogu talagalay dhibanayaasha soogalootiga ah ee dambiyada qaarkood. Codsadeyaasha u qalma waa inay waaxda sharci fulinta ay ka haystaan foom caddeyn oo sheegaya in qofku dhibbane yahay uuna yahay ama uu gacan ka gaystay baaritaan ama dacwad ciqaab. Sharcigan ayaa xaqiijin doona in dhammaan hayadaha/ururada u

xilsaaran adeegga nabadsugida ay ku dhammaystiraan caddaynta muddo cayiman, waxayna sidoo kale tilmaamaysaa arrimo la tixgelin karo, waxay dhowraysaa xogta shaqsiga ee hay'adaha socdaalka, oo waxayna hubineysaa in maamulka sharci fulinta uu u sheegayo dhibbanayaasha wax ku saabsan fiisada U.

- **SB 21-087 (**Sens J Danielson iyo D. Moreno iyo Reps K McCormick iyo Y Caraveo). Sharcigan wuxuu abuurayaa Xuquuqaha Shaqaalaha Beeraha, iyadoon loo eegin heerka soogalootanimo ee qofka, iyadoo la keenayo shaqaalo beeraaleey haysta xuquuq shaqaale kale oo badan oo ah kuwa haysta ay ka bogtaan - damaanad qaad mushaharka ugu yar ee lagu shaqeeyo iyo mushaharka saacadaha dheeriga ah, cuntada iyo biriirfka nasashada, xuquuq ah inay is abaabuli karaan, aqalka shaqaalaha ay marti ugu imaan karaan, oo ayna heli karaan shaqo badan iyo ilaalin caafimaad.